

TILMAANTA LA RAACAYO EE URURINTA XAAKADA

Waxaad u baahan doontaa...



Tuubada ururinta



Bac balaastig ah



Bac warqad ah



1 Toos



2 Qaado 3 neefsasho dheer oo tartiib ah



3 Soo qufac xaako/ candhuuf adag



4 Xaakada ku tuf tuubada



5 Afka ha kor saarin tuubada



6 Daboolka ku xir tuubada



7 Ku dheji tuubada calaamad wadata magac iyo taariikh



8 Tuubada ku rid bacda balaastikada ah



9 Tuubada ku rid bacda warqada ah




10 Bacda warqada ah ku rid talaagada



11 Ururi 1 tubo maalintii ilaa 3 maalmood

TILMAANTA LA RAACAYO EE LOOGU TALAGALAY TB



Waa maxay sababta ay baaritaanka xaakadu laga maarmaan u tahay?

Dhakhtarkaagu wuxuu rabaa in uu ururiyo kuwo ka mid ah xaakada (“candhuuf adag”) ee aad ka soo qufacday sambabadaada. Shaybaarka wuxuu xaakada ka baari doonaa jeermiska qaaxada (TB).

Baaritaanka xaakadadaadu waa habka ugu wanaagsan ee lagu ogaan karo haddii aad qabto TB. Haddii aad isla hadaba daawo u qaadanayso TB, baaritaanka xaakadadaadu waa habka ugu wanaagsan ee lagu ogaan karo haddii ay daawadu tahay mid shaqeynaysa.

Si aad u xaqiijiso in baaristu ay sax tahay, waa in aad soo qufacdo xaakada ku jirta gudaha sambabadaada. Xaakada ka imaanaysa sambabadaadu inta badan waa mid adag oo dhegdheg leh. Candhuuftu waxay ka timaadaa afkaana waana mid biyo ah oo khafiif ah. Ha ururin candhuufta.

Talo: Haddii aadan soo qufuci karin xaako, isku day in aad ku neefsato uumi ka soo baxayo qubeys diiran ama weel ay jiraan biyo karkaraya.

Waxaa waxyaalahan laga soo qaatay Waaxda Caafimaadka Minnesota, Barnaamijka Ka hortagga iyo Xakamaynta TB

Oregon
Health
Authority

WAAXDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. TB Control Program kala xiriir 971-673-0169. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.

Sida loo Ururiyo Muunada Xaakada

Dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada ayaa ku siin doona koob gaar ah oo balaastig ah oo loogu talagalay ururinta xaakadaada. Si tartiib ah u raac tallaabooyinkani:

1. Koobku waa mid aad u nadiif ah. Ha furin ilaa aad diyaar u tahay inaad isticmaasho maahane.
2. Isla marka aad toosto subaxdii (ka hor inta aadan wax cunin ama cabin), waxaad rumaydaa/cadaydaa ilkahaaga waxaanad ku luqluqataa biyo. Ha luqluqan.
3. Haddii ay suurtagal tahay, waxaad aadaa dibadda ama dariishada/daaqada fur ka hor inta aadan ururin muunada xaakada. Tani waxay caawimaad ka geysataa in ay dadka kale ka ilaaliyo jeermiska TB marka aad qufacdo.
4. Qaado neef aad u dheer oo neefta hay ilaa 5 ilbiriqsi. Si tartiib ah u ne efso. Qaado neef kale oo aad u dheer si aad ahna u qufac ilaa ay xaako soo gaarayso afkaaga.
5. Xaakada ku tuf koob balaastig ah.
6. Sii wad tani ilaa candhuuftu gaarto qiyaasta heerka 5 ml (ama ka badan) ee ku qoran koobka balaastiga ah korkiisa. Tani qiyaastii waa 1 qaado oo ah xaako ah.
7. Furka si adag ugu xir koobka si aanay wax uga soo daadan.
8. Dhaq oo qalaji dhinaca dibadda ee koobka.
9. Ku qor koobka korkiisa taariikhda aad ururisay xaakada.
10. Koobka ku rid sanduuqa ama bacda ay kalkaalisadu ku siisay.
11. Koobka sii shaybaarkaaga ama kalkaalisada. Waxaad koobka ku keydin kartaa talaagada habeenkii haddii loo baahdo. Ha ku ridin qaboojiyaha qaybtiisa sare ama ka kaga tegin heerkulka qolka.